Hagaha Tixraaca Dhakhsaha ah Accu-Chek Mobile – soomaali/somaliska

DB416

Bilaabidda isticmaalka qalabka Accu-Chek Mobile

Fur daboolka caarada si buuxda ilaa inta aad furi karto. Markaas ka dib uun ayaad awoodi in aad furto khaanka cajalka oo aad geliso cajalka shaybaarka.

Kor u riix badhanka qalabka.
Wuxu furayaa daboolka khanka cajalka.

Cabbiraha dhexgeli cajal shaybaar oo cusub. Xir daboolka khanka cajalka iyo daboolka caarada labadaba.

Ka Soo jiid xasawda bayteri-dhawrista ah cabbiraha. ka jar dahaarka dawridda ah shaashadda.

Cadaadi badhanka qiyaastii 2 sikin ilaa cabbiruhu shidmayo. Isticmaal badhannada si aad u doorato luqadda.



Cadaadi badhanka si aad u geliso luqadda aad rabto. Guji badhanka si aad u xaqiijiso luqadda aad dooratay.

Diyaarinta dhiigqaadaha farta

Daboolka ka fur dhiigqaadaha farta.



Geli qasnadda irbadaha (dhinaca cad u geli). Hadda waxad haysataa 6 irbadood oo cusub oo nadiif ah.

Irbadaha ha ka saarin qasnadda ilaa aad isticmaasho dhamman 6 irbadood. Dib uma gelin kartid qasnad irbadeed marka aad ka saarto.

Daboolka ku xir mar kale.

Wareeji daboolka dhiigqaadaha farta, ilaa gunta cabbeeyuhu la sinnaado tilmaamaha. Ku bilaw cabbayn dhexdhexaad ah sida 3, dabadeedna sidaa ku sallax.

Mar kale u diyaargaree dhiigqaadahaaga farta tijaabinta sonkorta dhiigga:
Riix marshada ilaa inta ay gaari karto ① dabadeedna dib u soo celi ②.

Waxad u baahantahay in aad maanka ku hayso

1 Faro nadiif ah

Ku mayr gacmahaaga biyo diirran iyo saabuun, una biyo-raaci si wanaagsan. Si wanaagsan ugu qallaji gacmahaaga tuwaal nadiif ah.

2 Dhibic dhiig ah oo si wanaagsan u qaabaysan

Had iyo jeer istixmaal dhibco dhiig ah oo yaryar oo si wanaagsanu qaabaysan.

3 Markiiba shaybaar

Saar dhiigga meesha lagu shaybaarayo markiiba marka aad hesho dhibic dhiig ah. Ha sugin inta aad saarayso dhibicda dhiiga.

4 Dhiigga si sax ah u dhig

Si taxadir leh ugu dhaqaaji dhibicda dhiigga ah bartmaha shaybaarka. Ha marmarin dhibcaha dhiigga ah eeriyada shaybaarka.

Samaynta shaybaarka sonkorta dhiigga

1

Fur daboolka caarada. Cabbiruhu wuu shidmayaa si otomaatig ah.

2

Dhiigqaadaha ugu riix si adag dhinaca dhiigqaadista ee la doortay. Hoos u Cadaadi badhanka sii deynta, si aad u hesho dhibic dhiig ah.

3

Si taxadir leh ugu dhaqaaji dhibicda dhiigga bartmaha eeriyada shaybaarka. Ka qaad fartaada eeriyada shaybaarka isla marka ay shaashadda ka muuqato “shaybaar ayaa socda”.

4

Shaybaarku wuxu ku dhammaystirmayaa qiyaastii 5 sikin. Akhri natiijada shaybaarka oo iska xidh daboolka caarada. Cabbiruhu wuu demayaa.

Roche Diabetes Care GmbH
Accu-Chek Kundsupport, telefoon: 020-41 00 42, iimayl: info@accu-chek.se, **www.accu-chek.se**

ACCU-CHEK®